



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR-SAXAAFADEED 11/2009**

#### **Ergayga gaarka ah ayaa ku baaqay in la muujiyo midnimo iyadoo la xasuusanaayo aasaasayaashii ururkii SYL**

New York, 15 May 2010 – Ayadoo la joogo Sanad Guuradii 67aad ee aasaasakii ururkii SYL, ayaa Ergayga Gaarka ah Qaramadda Midoway u qaabilsan Arrimaha Soomaaliya Axmedou Ould-Abdallah ayaa u direy tahniyad aasaasayaashii Ururkii SYL, Qaraabadda iyo dadka Soomaaliyedeba.

“Maanta oo laga joogo 67 sanno ayaa waxaa isku yimid koox wadaniyiin Soomaaliyeed ah iyagoo isku eegeynin heer Gobol, Qabiil ama maslaxad dhaqaaleba ayaa go’aan ku gaaray inay u dagaalamaan madaxbanaanida iyo sharafta wadankooda waxay go’aansadeedn in ay la dagaalamaan gomeysigii si madaxbaani iyo sharafta Ummaddooda loo helo. Fariintoodana waxaa laga maqlay ama laga dareemay dhamaan Soomaaliya, Africa iyo dunida inteda kaleetaba.

“Manta oo ah maalin taariikheed, anigoo ku hadlaya magaca Xoghayaha Guud ee Qaramadda Midoway waxaan jeclahay inaan u diro salaam lagu saxuusanaayo wadaniyiintaasi Soomaaliyeed. Anagoo ka duuleyna ama ka shidaal qaadaneyna wadaniyada ay manta xambaarsan tahay waxaan doonayaa inaan ugu baaqo dhamaan waxgaradka, aqoonyahanada Soomaaliyeed ha joogaan dalka gudihiiisa ama dibaddisaba inay muujiyaan midnimo ku saabsan dhinaca aragtidooda ah iska diidaan faragelinta qaawan ee lagu haayo madaxbanaanidooda iyo sharaftooda. “waxaan rajaynayaa inay noqoto sanadguiradani tii dadka Soomaaliyed isku keeni lahayd ee ay uguna wada istaagi lahaayeen inay dib ula soo noqdaan sharaftoodii iyo madaxbanaanidoodii madaama ay bilaabaya sanadguuradii 67aad”.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)